Siyaasadda JE-R- Habraacyada Soo Xaadiridda Ardayga

I. QEEXITAANO

A. Maqanaanshaha cududaarka leh waa maqanaanshaha leh fasaxa waalidka/mas'uulka iyo maamulaha dugsiga. Maqanaanshaha noocaas ah waxaa ka mid ah kuwa ka dhasha waxyaabahan soosocda:

1. jiro ama dhaawac aan joogto ahayn

2. Xaaladda ama naafonimada dhimirka, jirka ama dareenka

B. Maqanaanshaha aan cududaarka lahayn waxaa ka mid ah kuwa ka dhasha dugsi ka joojinta ama dugsi ka cayrinta, marka laga reebo sida lagu sheegay Qaybaha hoose ee II-B, II-B 4, II-B 5 iyo II-C, ama kuwan la socoda fasaxa waalidka/mas'uulka balse aan lahayn fasaxa maamulaha dugsiga

A. Goo-goysnimada waa maqanaanshaha aan lahayn fasaxa waalidka/mas'uulka iyo maamulaha dugsiga.

D. Ardayga goo-goyska caadaystay waxaa loo qeexaa sida arday yeesha afar maqanaansho oo aan cududaar lahayn ama maqanaansha bil kasta ama toban maqanaasho aan cududaar lahayn ama maqanaanshaha sannad dugsiyeed kasta eena da'dooda u dhaxeysa toddobo ilaa lix-iyo-toban sano, haddii uu dhigto fasalka koowaad ama ka sare, uuna jiro lix-iyo-toban sano; ayadoo ulajeeddadu tahay qeexitaanka ardayga goo-goyska caadaystay , maqanaanshaha sababta u ah dugsi ka joojinta ama dugsi ka cayrinta waxaa loo tixgelinayaa mid cududaar leh

E. Kumaqanaanshaha adeegga dugsiga waxaa ka mid noqonaya ardayda ka qaybqaadanaysa waxqabadyada dugsiga la oggolaadey ama hore ay u aqbaleen maamulka dugsiga; ardayda waxaa loo xisaabayaa in ay joogaan dugsiga ayadoon la tixgelinaynin goobta waxqabadka

II. HABRAACYADA LAGU DHIIRIGELINAYO SOO XAADIRIDDA DUGSIGA MAALIN KASTA

A. Dugsi kasta iyo macalin kasta wuxuu mas'uul ka yahay ilaalinta diiwaanada saxda ah ee maqanaanshaha ardayga, soo raagidda, iyo goo-goyska.

B. Habraacyada dugsiga iyo qaanuunada waxaa ka mid noqonaya, balse aanan loo baahnayn in lagu xaddido, kuwan soo socda:

1. Ogeysiinta waalidiinta/mas'uuliinta ubad kastoo dhigta, sannad kasta biloowga sannad dugsiyeed kasta ama marka isqoritaanka, waxyaabahan soosocda:

a. Waa waajibaadka waalidka/mas'uulka iyo ubadka in ay hubsadaan in ubadka uu soo xaadiro dugsiga maalin kasta iyo in uu u hoggaansamo sharciyada soo xaadiridda dugsiga si loo helo waxbarasho habboon

b. Qaanuunada iyo habraacyada dugsiga ee khuseeya soo xaadiridda

2. Habka ogeysiinta waalidka/mas'uulka ee maqanaanshaha ubadka ee dugsiga ka maqnaanshaha haddii dugsiga uu helay wax caddeynaya in waalidka ubadka uu ka warhayo maqanaanshahaasi; ogeysiinta waxay noqonaysaa taleefoon ahaan maalinta maqanaanshaha, hadii ay suurtagal tahay, qoraal ahaan, ama habab kale

3. Cawaaqibyada goo-goyska, maqanaanshaha aan cududaarka lahayn, iyo soo raagidyada aan cuduraarka lagayn waxaa ka mid noqon kara fasalada hoose u dhaadhic ama waynta dhibic waxbarasho

4. Keenidda qorshe sameyn, taasi oo noqon karta qoraal ahaan, si loogu caawiyo ardayga caadaystay maqanaanshaha in uu ku nagaado dugsiga; habraacyada noocaas ah waa in ay bixiyaan furasdo loogu talagalay ka qaybgalka dhammeystiran ee waalidka/mas'uulka qorshe sameynta; qorshaha, ugu yaraan, waa in uu muujiyo sababaha maqanaanshaha iyo talaabooyinka looga guuleysanayo

Bilaabidda dacwada maxkamadeed, ayadoo laga dabqaadanaya garsoorka xirfadeed ee maamulaha dugsiga iyo shaqaalaha, marka laga reebo in dacwadda maxkamadeed ee noocaas ah ay waajib tahay in la bilaabo haddii ay ardayda ay leeyihiin in ka badan soddan (30) goo-goys ama maqanaashaha aan cududaarka lahayn inta lagu guda jiro sannad dugsiyeedka; ayadoo ulajeeddadu tahay qayb-hoosaadkan, maqanaanshaha sababta u ah dugsi ka joojinta ama dugsi ka cayrinta waxaa loo xisaabayaa mid cududaar leh

5. Qoondada shaqo qabashada ee loogu talagalay ardayda laga joojiyay dugsiga marka uu codsado waalidka/mas'uulka ama ardayga, taasi oo laga yaabo in ay ka mid noqoto siinta dayn qayb ah ama dhammeystiran ee shaqada noocaas ah, haddii si lagu qanco loogu dhammeeyo hab waafaqsan wakhtiga

6. Hab lagu hubsanayo in sharciyada si joogto ah loogu adeegsanayo dhammaan ardayda

C. La noqosho, habka waafaqsan wakhtiga, ee ardayda da'doodu ay ka weyn tahay 16 sano haddii ay maqnaayeen labaatan (20) maalmood oo kuwa dugsiga ah ee isku xiga iyo maqanaanshahana uu yahay maqamaansho aan cududaar lahayn ama goo-goys; ujeeddada qaybtan, maqanaanshaha sababta u ah dugsi ka joojinta waxaa loo tixgelinayaa cududaar

Haddii, si kastaba, ay noqoto in arday aan lagala noqonin kadib labaatan (20) maalmood oo kuwa dugsiga ah oo isku xiga ilaa dugsiga uu ka sameynayo dadaal adag oo loogula xiriirayo ardayga iyo/ama waalidka taleefoon ahaan ama booqasho guriga ah ayadoo ujeeddadu ay tahay muujinta sababaha soo xaadirid la'aanta iyo sameynta xeelado wax looga qabanayo; hawlwadeenka dugsiga oo ku habboon. oo uu ka mid yahay shaqaalaha bulshada iyo la taliye; waa in uu ku lug yeesho dadaalkan

Shuruuddan kama hortagayso la noqoshada ardayga maqnaa in ka yar labaatan (20) maalmood oo kuwa dugsiga ah ee isku xiga

D. Ayadoo la tixraacayo CRS 22-33-107.1, Degmada waxay ogeysiinaysaa waalidka/mas'uulka ardayda ka tageysa dugsiga sare ee aan ku khasbaneyn shuruudaha soo xaadiridda waajibka ah. Ogeysiiskan wuxuu yeelanayaa yoolka la isugu dayayo in loogu soo celiyo ardayga dugsiga iyo gaarsiinta cawaaqibyada mustaqbalka-fog ee ardayda ka tageysa dugsiga.

III. QORSHEYAASHA SOO XAADIRIDDA DUGSIGA IYO ARDAYGA

A. Degmada waxay sameynaysaa qaab-dhismeed qorsho oo lagu horumarinayo soo xaadiridda ardayda loo aqoonsadey in ay caadaysteen goo-goyska

B. Degmada waxay sameynaysaa qaab-dhismeedka jaranjarada soo xaadiritaanka ee laga yaabo in ay u adeegsadaan dugsiyada sida qayb ka mid ah qorshe loogu dhiirigelinayo soo xaadiridda maalin kasta

La Ansaxiyay: 5 Sibteembar, 1996
Taariikhda dhaqangalka: 1 Oktoobar, 1996
La muraajaceeyay: 16 Juun, 2000
Soo ansixiyay Kormeeraha guud
Taariikh: 14 Oktoobar, 2005

TIXRAACYADA SHARIGA AH. CRS 22-33-107.1

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JE, Soo Xaadiridda Ardayga